QORSHE
Loogu talo galay gogol dhigga
dadka ku cusub degmadda Avesta
2011 - 2013

QORSHE
Loogu talo galay gogol dhigga
dadka ku cusub degmadda Avesta
2011 – 2013

Degmada Avesta waxayba billoowgii 2011 horay u gaartay heshiis sii wadid ah oo ay la gaartay wakaaladda socdaalka iyo hoggaanka gobolka. Degmada Avesta waxay dib u qaadatay sannad kastaa 50 dad cusub ah. Qiyaastii 25 ka mid ah waa inay iskood isu dejiyaan, 25 ka kalana waa inay ku yimaadaan dariiqa xafiiska xiriirka shaqada ama masaruuf wakaaladda socdaalka ah. Qorshaha gogol dhigga ah ee degmada waxaa saxaya hoggaanka barashada, waxaana loo qaad qaadanayaa saddex saddex sano intaas kadibna dib baa loo habayn,

Qorshaha gogol dhigga ah danta laga leeyahay waa:-

- In la adkeeyo siyaasadda degmadu ka leedahay arrimaha dadka cusub ee ay degmada Avesta qaabisho sida uu qabo heshiiskii wakaaladda socdaalka iyo hoggaanka gobolka.
- War galin ku saabsan shaqada degmada ee ah gogol dhigga loogu talo galay dadka cusub.

Waajibaadka ka saran degmada Avesta dadka cusub ee ay qaabilayso waa inay u diyaariso degaan ay dejiso, barashada afka iswiidhishka, hanuuninta bulshada, xannaanada carruurta iyo dugsiyada iyo waliba siyaalo kala duwan oo qofka loogu fududeeyo gogol dhigga ku saabsan bulshada Iswiidhan,

Sida ku cad xeerka maamulka farqadiisa 8aad wuxuu sheegaa in lagu kalsoonaato tuljubaanada markay tahay xafiisyada dowladda. Qofku codsigiisa shqasiyeed waa kan na tusaya in lagu kalsoonaado turjubaanka. Degmo kastaa maamulkeeda ama hay'adaha dowladeed ee kale iyagaa mas'uul ka ah marka turjubaan in lagu kalsoonaado loo baahdo iyo waliba iyagaa bixinaaya kharashkiisa ku baxaya.

Xafiiska xiriirka shaqada, maamulka barashada, wakaaladda socdaalka iyo hoggaanka gobolkuba way kulmayaan si ay u fududeeyaan una wanaajiyaan is dhex galka dadka cusub iyo bulshadan.

Shaqada qaabilaada dadka cusub waxaa is ogaysiinaya oo si dhamays tiran u tix galinaya oo ka wada shaqaynaya qaybaha kala duwan, si ay u abuuraan shabakad iyo xiriir lala yeesho ganacsiga, hannaanka jamciyadaha iyo guud ahaanba si loogu fududeeyo qofka cusub sidii uu usoo gali lahaa bulshada dhexdeeda iyo nolosha shaqada iyo waliba sidii loogu fali lahaa jidkii uu qofku uga qayb qaadan lahaa si fir fircoon geeddi socodka dimuqraadiyadda.

Sharci cusub – fursado cusub

Taariikhdu markii ay ahayd 17kii maarso ayay golaha shacabka go'aamiyeen sharci cusub, kaasoo ku deg degaya dadka cusub inay la qabsadaan nolosha shaqada iyo nolosha bulshada. Qof kastoo cusub iyadoo la fiirinayo horu socodkiisa wuxuu helayaa taageero khibradeed sii hadba sida ugu dhaqasaha badan uguna macquulsan ugu barto afka iswiidhishka, usoo galo shaqo iyo waliba inuu iskiis isu masaruufo.

Sharciga cusub ee (2010:197) ee kusaabsan tallaabooyinka meelaynta dadka cusub ee qaxootiga ah qaarkood wuxuu hir galayaa laga billaabo 1da diseember 2010 ka. Macnahiisuna waa in la baddalay ama mas'uuliyad cusub la saaray xafiiska xiriirka shaqada, degmada, hoggaanka gobolka, qasnadda caymiska iyo waliba wakaaladda socdaalka. Isla markaasna waxaa la billaabay in la isticmaalo etablerinslotsen. Sharcigan cusubi wuxuu xitaa macanihiisu yahay in qofkii ugu madaxsanaa ama mas'uuliyadda qaabilaadda qofka cusub ee qaxootiga ah lahaa laga soo wareejiyay degmada loona soo wareejiyay xafiiska xiriirka shaqada.

Mas'uuliyadda iyo waajibaadka degmada.

Xitaa sii wadidda arrimahan waxay degmadu ku leedahay kaalin muhiim ah meelaynta dadka cusub. Haddii laga reebo sii wadidda mas'uuliyadda gogol dhigga dadka aan soo hoos galayn sharciga cusub waxay xitaa degmadu mas'uul ka tahay qodobyadan hoose:

- Qaabilaadda iyo masruufka degaanka.
- Haddii loo baahdo caawimaadda gacan ka qabashada iyo waliba degaanka.
- Wax baridda SFI iswiidhishka qaxootia iyo wixii kalee wax barasho dadka waawayn ah.
- Wacyi galinta bulshada
- Dugsiyada, wax qabadka xannaanooyinka, daryeelka carruurta iyo wixii kalee wax qabad ah ee ku saabsan carruurta iyo dhallin yarada.
- Wax qabadka gudaha xafiisyada adeegga bulshada.
- In la eego in wax qabadyada kalee degmadu uu qofkan cusub ka qayb qaato.
- Masaruufidda iyo wax qabadyada kale kuwa aan xaqa u lahayn inay ka qaby qaataan sababtuna ay tahay awooddiisa wax qabad.

Hadafka u yaalla qaabilaadda qaxootiga iyo galtida kale ee degmada Avesta

- 100% waxaa laga rabaa la qaabilaha qofka wayn ee leh kartida shaqo iyo kaan lahayn kartida shaqo oo ah 25% iyadoo 2 sano oo gogol dhigg ah kadibna uu u baxayo inuu shaqaysto oo is masruufo, oo uu ka qayb qaato sii wadasho wax barasho ama uu jara bar aado.

- Isla markaasna qofkan la qaabilay oo waliba si buuxda u fuliya barnaamijka gogol dhigga muddada 2da sano ah oo waliba deggan Avesta wuxuu la kulmayaa sidan;

- Degaan shaqaynaya
- Aqoon luuqada iswiidhishka ah oo ku filan hal hawl maalmeed
- Suurto galnimo keenaysa in laysku masaruufo shaqo ama wax barasho
- In caafimaadka dhimisru uu wanaagsanyahay
- Xiriir bulsheed shabakadeed
- Aqoon in loo leeyahay bulshada Iswiidhan

Hadafyada maxaligga ah waxaa daba galaya hoggaanka barashada iyadoo lagu xiriirinayao xisaab xirka sannad kastaa.

Ururada qaabilaya dadka cusub ee degmada Avesta

Mas'uuliyadda ugu wayn ee qaabilaadda qofka cusub waxay hoos taal maamulka hoggaanta barashada, halkaasoo hawlaha gacan qabadka ah ay ku dhacayso xayndaabka hoggaanka barashada waaxdiisa is dhex galka (SIVA)

Si loogu sahlo shaqo maalmeedka qaabilaadda iyo gogol dhigga waxaa jira koox shaqo oo uu horjooge u yahay maamulka barashada (SIVA) iyo xafiiska xiriirka shaqada.

Danta laga leeyahay kooxdan shaqadeedu waa markii laga soot ago hay'adaha kala duwan waajibaadkooda shaqo I si fiican loola shaqeeyo, loo qorsheeyo iyo in la fuliyo hawlo gogol dhigyo kala duwan.

Maalgalinta ay degmadu maal galiso qaabilaadda qaxootiga sida ku cad nidaamkii hore

Degmadii qaabisha qaxootiga dariiqa wakaaladda socdaalka waxaa la siinayaa deeq doowladeed oo gaar ah oo loogu talo galay qaxootigan la soo qaabilay. Deeqdaas dowladeed ee gaarka ah waxaa caadi ahaan loogu yeeraa lacag gunno ah waxaana lagu siiyaa iyadoo uu taageerayo qodobka maamulka ee qodobka (199:927) oo ku saabsan deeqda dowladda ee qaabillaada qaxootiga iwm. Lacagta la siinayo degmada waa lacag hal mar ah waxaana la bixinayaa muddo 2 sano gudahood ah.

Deeqada dowladda waa inay ku fillaataa kharashka ku baxaya qofka masruufkiisa, barashada afka iswiidhishka iyo is dhex galka. Xitaa haddii lacag bixintu ay dhacdo xilli 2 sano gudahood ah waa in lacagta deeqda ah sida ku cad wakaaladda socdaalka waa inay kafaysaa kharashaadka degmada ee kaga basaha qofka masaruufkiisa iwm, celceliska muddo dhan 3 sano iyo bar. Taasi dhab ahaantii waa in dadka qaarkiis ay iskood isu masaruufayaan inta aysan dhammaanba waqtida 2 sano ah ee barnaamijka gogol dhigga, halka ay kuwo kalana uga baahanyihiin inay bulshadu masaruufto waqti ka dheer 2 sano.

Sida lagu bixiyo lacagta deeqada ah waxay u dhacaysaan sidan hoos ku qoran, arrinku waa in degmada Avesta ay tahay qofka degmadiisa ugu horraysa ee degaan;

- Lacag bixinta ugu horraysa – 20 % ka mid ah wadarta lacagta
- Intaas kadibna 10 % ka mid ah lacadta rucab kastaa (Waqtiga deeqda) oo ah siddeed jeer oo lacag bixin,

Haddii degmada Avesta ay qaabisho qor horay u deggana degmo kale waxay degmada Avesta xaq u leedahay illaa iyo 20 % oo lacag deeq dheeraad ah.

Taasna waxaa laga soo qaadayaa si kastaa ha ahaatee in geeddigu uu ahaa 18 bilood gudahood laga soo billaabo markii laga soo guuray degmadii ugu horraysay ee uu deggay. Guud ahaanna lacag bixintu waxay u dhacaysaa 10 % ka mid ah lacagtii deeqda ahayd rubuc kastaa oo ka mid ah 24 taariikh bileed oo laga soo guuro laga soo billaabo degmada ugu horraysa ee qaabishay.

Marka laga soot ago lacagta deeqda ah waxaa degmada la siinayaa lacag gaar ah oo maamul sannad kastaa. Deeqdan way isla egtahay degmadu siday doonto ha u waynaatee ama ha u yaraatee.

Maalgalinta ay degmadu siiso qaxootigeeda ay qaabisho sida ku cad xeerka

Degmadu waxay lacag ku heli kartaa waa:

- Qofka lagu soo wareejiyo Iswiidhan isagoo ah qaxooti la soo qaatay

- Qofka ahaan jiray magan galyo doon oo ka diiwaan gashan wakaaladda socdaalka habka qaabilaadda oo loona ogolaaday deggenaanshaha qaxootinimo, magalgalyo u baahane ama sababtu ay tahay dhibaato muuqata oo duruufeed.

- Qofka lagu siiyo deggenaanshaha si qaxootinimo, magalgalyo u baahane ama sababtu ay tahay dhibaato muuqata oo duruufeed oo aanna ka diiwaan gashanayn wakaaladda socdaalka.

- Qofka u baahan magan galyo ku meel gaar ah oo shardi ku jiro oo ogolaanshuhuna uu yahay ugu yaraan 1 sano oo qura.

- Qofka sharciga lagu siiyo marqaatida maxkamadaha.

- Qaraabada sharciga lagu siiyo isku xirnaanka qofkan kor lagu soo xusay (waase haddii qaraabadu ay soo dalbato sharciga degganaanshaha muddo 2 sano laga billaabo marka qaraabadu ay qaabisho degmadu)

Lacagaha qaarkood waxaa si toos ah u bixinayaa wakaaladda socdaalka hadba degmaga ay qusayso iyadoo aanba la codsan. Lacagaha qaarkoodna degmadu waxay ka codsan kartaa wakaaladda socdaalka. Taasina waxay ku xirantahay ogaalada laga helo lacagaha kala duwan.

Lacagta aasaasiga ah waxay u dhigantaa;

- Sannadka 2011 ka saddexda qof ee waawayn (16-64 jir) lacagta deeqada ah sida ku cad xeerka (1990:927) ee ku saabsan lacagta dowladdu ku bixiso qaabillaada qaxootiga.

- Laga soo billaabo sannadka 2012 ka. Toban qiimaha lacagta sida ku cad cutubka 2 aad, 6 aad iyo 7 aad ee xeerka arrimaha bulshada.

Lacagta deeqda dowladda

Degmadu waxay heli karaa lacagta deeqda dowladda sida ku cad cutubka 10 – 14 ee xeerka tirsigiisu yahay (2010:1122) ee ku saabsan deeqda dowladdu ku bixiso wax u qabashada anaajiibta qaarkood.

Degmada ugu horraysa ee qaabisha waxay qax u leedahayay 10 % oo kamid ah lacagtiii deeqada ahayd. Degmada ay ajaaniib kastaa ka iska diiwaan galiyaan muddo labo bilood ah kadib waxay xaq u leeyihiin 20 % lacagta deeqa ah. Lacagta deeqda dowaladda ee soo hartay waxaa loo bixinayaa iyadoo isku jirta saddex taariikh bileed oo ah 10 % bxilli kastaa.

Haddii ajaanibku uu u guuro degmo cusub muddo 18 bilood gudahood ah waxay degmadaasi xaq u yeelanaysaa 10 % ka mida lacagtii deeqda ahayd si ay ugu noqoto lacag dheeraad ah.

Lacagta deeqda dsowladda waxaa loo kala qaybiyaa muddo 2 sanadood gudahood ah, waxaana lacagta bixinaya wakaaladda socdaalka si toos ahna u siinaya hadba degmadii ay qusayso, iyadoo aysan degmadu u baahan in ay soo gudbiso wax codsi ah.

Marka laga soo tago lacagta deeqda dowladda ah waxay degmadu dib u codsan kartaa kharashaadyo kale.

Lacagta gogol dhigga ah waxay qusaysaa qofka loo aqoonsado xeerkii hore ee duqa ahaa

Qofkii wayn ee degmo lagu meeleeyo wuxuu helayaa lacagta gogol dhigga ah in muddo ah oo uu isagu ama iyadu ka qayb daanayaan barnaamijka gogol dhigga ah. Sidaas darteed ayaa loo damaana qaaday inuu qofku ku noolaado nolol heer nololeed ah, taasoo u shaqaynaysa sida mushaarka la siiyo dadka shaqeeya, halkaasoo ka qayb qaataha barnaamijka gogol dhigga ah uu la simanyahay kuwa shaqeeya, taasoona ay jirto cadaadis acd oo shardiyaysan.
Haddii uu qofku dakhli gaara ah leeyahay inta uu ku jiro waqtiga gogol dhigga waxaa lacagta la siinayo lagu jaan goonayaa hab go’an oo habaynsa.

Xaq u yeelasahada lacagta gogol dhigga ah waa qofka loo aqoonsado inuu xaq u leeyahay lacagta deeqda heer xukuumad (Xeerka ku saabsan lacagta gogol dhigga ah, SFS 1992:1068) iyo waliba inuu ka mid yahay qaabilaada qaxootiga degmada Avesta iyo galtideeda kalaba. Degmadu iyadaa xaq u leh inay go’aan ka gaarti xajmiga ay lacagteedu gogol dhiggu la ekaanayso.

Hadda si loo helo lacagta gogol dhigga ah wuxuu ku xiranyahay qofkan wayn inuu raaco qorshaha gogol dhigga shaqsiyadeed. Qof kastoo lagu qoro barnaamijka gogol dhigga ah wuxuu saxiixayaa hal heshiis kaasoo xuquuq iyo waajibaadka ku qoranyihiin

Lacagta gogol dhigga ah waxaa maamulaya oo bixinaya maamulka barashada.
Xeerka gaarka ah ee loo marayo lacagta gogol dhigga ah waxaa laga soo qaadanayaa maamulka barashada.

Inta lagu guda jiro 2 da sano ee ugu horraysa kadib markii qofla lagu meeleeyo degmada Avesta way dhammaanaysaa lacagtii gogol dhigga ahayd. Qofkii isagu sababo kala duwan dartood uga baahda in loo dheereeyo waqtigii gogol dhigga waxaa dhici karta in la siiyo lacag gogol dhigga ah oo gaar ah ugu badnaan muddo hal sano iyo bar. Go'aanka ah in xaq loo yeesho lacagta gogol dhigga gaarka ah waxaa lagu jaan gooynayaa qorshe gogol dhig shaqsiyadeed.

Lacagta shaqsiga la siinayo sida ku cad xeerka cusub
Qofka cusub ee qaxootiga ah iyo qaraabada loo aqoonsado sharciga dejinta (2010:197) oo aan markaasna haysan wuxuu isku masaruufo, waxaa la siinayaa taageero dhaqaale oo loogu yeero lacagta dejinta oo ay siinayso dowladdu, waxaana bixinaya qasnadda caymiska. Waxaana dhici karta mararka qaarkood in qofka la siiyo cayr ama saageero masaruuf.

Xaaladaha ay degmadu u baahan karto taageero dhaqaale in la siiyo
Dhowr xaaladood oo kala duwan haday timaaddo guryaha dadka cusub ku nool ayaa loo aqoonsan karaa inay u baahanyihiin taageero dhaqaale sida ku cad xeerka cutubka 4 aad farqadiisa 1 aad xeerka adeegga bulshada (2001:453)

Halkan hoosed waxaa lagu soo qoray tusaale kuwan oo kale ah iyo waliba noocyada fursadaha ay degmadu ka helayso lacagta deeqda dowladda sida ku cad xeerka (2010:112) ku saabsan deeqda dowladdu ay ku bixiso wax qabadka ajaaniibta qaarkood:

- **U diyaarin taageero dhaqaale kadib marka la helo sharciga degenaanshaha oo ah lacah bixinta ugu horraysa qayb ka mida lacagtii degaamaynta iyo waliba ku dariddii hantida ("glappet").**
  Degmada waxaa loogu baddalayaaa deeqda dowladda ee gaarka ah.

- **Qofkan cusub waxaa lagu jaan gooynayaa lacagta degaamaynta iyo waliba hantida loogu darayaba (75 %) si ay ula shaqeeyaan sixitaanka qorshaha degaamaynta.**
  Degmada wax dhaqaale ah oo dheeraadka kuma helayso kharashaadkan. Waa in ay ku filaataa lacagtii deeqada dowladda ahayd ee hore (10§)

- **Qofka cusub wuxuu leeyahay lacagta degaamaynta iyo hanti ugu daris laakiin wuxuu sugayaa lacag bixinta iyo deeqaha ka yimaada caymiska bulshada (deeqda carruurta, kaalmada guriga, kaalmada kali haynta imw.)**
  Degmadauna sida ku cad xeerka arrimaha bulshada waxay dib usoo ceshan karaan kharashyada qaarkood ee ah taageerada ka timaadda qasnadda caymiska. (210: 110, 107 cutubka. 5 §)

- **Qofkan cusub wuxuu helaa lacagta degaamaynta ah iyo waliba hanti ugu darid iyo waliba deeqda xafiiska bulshada laakiin wali maahan mid is masaruufaya.**
  Degmadu wax lacag dheeraad ah oo ay ku helayso ma jirto kharashaadkan. Waa in ay ku filaataa lacagtii deeqada dowladda ahayd ee hore (10§)

- **Qofkan cusub waxaa haysa harti darro ah 25 % oo xilli buuxa ah sababtuna ay tahay xanuun ama wax kale oo nafsi aha ama jismi ah ama naafonimo ah, oo uu sidaas dareteedna xaq ugu lahayn qorshaha degaamaynta iyo lacagta degaamaynta.**
  Degmaduna dib bay usoo dalban kartaa kharashaadkii kaga baxay taageerada dhaqaalaha (19 § faqrada koowaad qodabka 1)
- **Qofkan cusub kama uu qayb qaadan karo wax qabadyada degaamaynta xilli buuxa oo iyadu ama isagu ay kartidiisu tahay 25, 50 ama 75 boqolkiiba sababtuna ay tahay cudur ama wax kale oo xannuun nafsiyan, jismiyan naafonimo ah oo markaasna lacagtii degaamaynta loogu jaangooyay wax u dhigma.**
  Degmaduna dib bay u dalban kartaa kharashaadkii kaga baxay taageeridda dhaqaalaha (19 § faqrada koowaad, xubinta 2 aad). Degmaduna waxay taas helaysaa taniyo inta qofku haysto qorshe degaamayn.

- **Qofkan cusub kama uu qayb qaadan karo wax qabadka degaamaynta sababtuna waxay tahay wuxuu hayaa carruur ama cusur aan ka mid ahayn kuwa kor lagu soo xusay (Mid aan ku fillayn lacagta waalidka aan lahayn lacagta bukaanka).**
  Degmadu wax lacag ah oo gaar ah ma helayso. Waa in ay ku filaataa lacagtii deeqada dowladda ahayd ee hore (10§)

- **Dhallin yarada 18 – 21 sano jirka ah oo aan waalid ku lahayn waddankan gudigiisa, dhiganaya dugsiga sare oo aanna waxba ku lahayn daryeelka guriga iskood mooyaanee waxaa la siinayaa taageerada So Lama LVU.**
  Degmadu dib bay usoo dalban kartaa kharashkii kaga baxay taageeradii dhaqaalaha (20 §).

Lacgta laysa siiyo marka ay dhammaato lacagta degaamaynta kadib.
Haddii qofku uusan iskiis isu masaruufi karin kadib markii ay u dhammaatay lacagta degaamaynta iyo qorshaha degaamaynta, oo aan si kalana masaruuf xasiloon u haysan, waxaa qofkaas loo tilmaamayaa taageerda dhaqaalaha degmada. Degmaduna wax dhaqaale ah oo dheeraad ah kuma uu helayo kharashaadkan. Waa in ay ku filaataa lacagtii deeqada dowladda ahayd ee hore (10§)

Degmaduna dib bay u dalban kartaa kharashka ku baxa qofka aan isa masaruufi karin sababtoo ah cudur ama naafonimo haysay markii ugu horraysay ee ay degmadu qaabishay amaba leh xaalad si toos ah ula xiriirsan xaalad ah magangalyo u baahne (9 § faqrada koowaad, xubinta 3). Degmadu kharashaadkan dib bay u codsan karaan taniyo inta shaqsigu uusan ka haysan dhalasho iswiidhish.

Lacag dheeraad ah
Degmada heshiis 3 sano ah la saxiixatay wakaaladda socdaalka iyo hoggaanka gobolka waxay helayaa lacag hal mar la siiyo oo ah qof kastoo qaxooti ah oo ay qaabilaan 10 000 kr.
Marka laga soo tago lacagtaas halka mar ah, waxay degmadu qof kastaa oo u dhexeeya 18 – 65 sano oo muddo 12 milood ah:

- Lahaa jaro bar ugu yaraan 5 mbilood waqti buuxa ama bar ah ama
- Gaaray ugu yaraan wuu gudbay shahaadada SFI, afka iswiidhishka ee qaxootiga, wuxuu helayaa 20 000 kr. taasna waxaa sharciyeeyay ErsF 2007:662

Degmada Avesta waxay leedahay heshiis sii wadid ah oo ay la gaartay wakaaladda socdaalka iyo hoggaanka gobolka. Lacagtan dheeraadka ah ee ka timid wakaaladda socdaalka ee ha 20 000 kr oo ay shuruudna la jiro sida kor ku xusan, waxaa iyadoon la soo gaabin loo isticmaalayaa wax qabadyada sida; qaab wax barasho taasoo ku hagaysa hadafka ah is masaruufid.

Lacagta dheeraadka ee loogu talo galay 0 – 16 jir ee ah 10 000 kr qofkiiba waxaa laga soo xawilayaa is dhex galka oo loo xawilayaa xannaanada carruurta iyo fasalka eberka illaa iyo fasalka 9 aad. Lacagtaas waxaa loo isticmaalayaa arrimaha is dhex galka u gaarka ah carruurta iyo dhallin yarada xaqootiga. Lacagta 17 – 18 jirka ah ee ah 10 000 kr waxaa loo xawilayaa dugsiyada sare ee ay dhallin yaradu wax ka baranayaan. Lacagtaas waxaa loo isticmaalayaa arrimaha is dhex galka u gaarka ah carruurta iyo dhallin yarada xaqootiga ee dhigata xannaanada iyo fasalka eberka illaa iyo fasalka 9 aad iyo waliba 16 – 17 jirrada.

Wacyi galinta bulshada

- Wacyi galinta bulshada ee ku saabsan xiriirka bulshada iswiidhan, nolosha bulshada iswiidhan iyo nolol maalmeedka degmo kamida degmooyinka waa inay ahaataa ugu yaraan 60 saacadood oo waliba haddii ay suurto galayso waa inay afka hooyo noqotaa. Waana in ay ku jiraan siddeedan qodob ee hoose:

1. In uu yimaado Iswiidhan.
2. Inuu degganyahay Iswiidhan.
3. Inuu isa masaruufo oo uu ku horu maro iswiidhan.
4. Xuquuqda shaqsiga iyo waajibaadka shaqsiga.
5. In uu dhisto reer oo uuna kula noolaado Iswiidhan.
6. In uu saamayn ku yeesho Iswiidhan.
7. In uu caafimaadkiisa ku daryeelo Iswiidhan.
8. In uu ku gaboobo Iswiidhan.

Degaanka

Qofka degmada lagu meeleeyo waxaa laga siiyaa guri ku habboon qolyaha guryaha kireeya ee degmada jooga. Is ku duwaha is dhex galka wuxuu si joogta ah u haynayaa xiriirka uu la yeelanayo guri kireeyaha si hadba guri ku habboon loogu helo. Shaqsigu isagaa iskiis u saxiixanaya shirkadaha guryaha kireeya, laakiin lixda bilood ee ugu horreeya waxaa damiinanaya degmada oo la qaadaysa guriga.

Barashada afka iswiidhishka iyo wixii kale wax barasho dadka waa wayn

Iswiidhishka qaxootiga loogu talo galay (SFI) waxaa la siiyaa isal xaqootiga degenaanshaha laga siiyi Iswiidhan. Isla xeyndaabkaas waxay degmadu wax barashadeeda dadka waa wayn wax barasho dadka waa wayn laga soo billaabo markuu qofku buuxiyo 20 sano. Mararka qaarkoodna waxaa xitaa dhici karta in dhallin yarada ka billioowda 16 jir waxaa iman karta su'aal ah wax barashada dadka waa wayn oo uu sameeyo isku duwaha is dhex galka isagoo la tashanaya jiheeyaha wax barashada, wixii ku saabsan dhallin yarada dugsigooda sare iyo waliba dhallin yarada naftooda inay helaan ka qayb qaadasho wxa barashada dadka waa wayn ee ku habboon baddalkeeda. Wax barashadu waa 21 – 35 saacadood todobaadkiiba. Wax barashadu waxay ka koobantahay akhris iyo jara bar luuqadeed. Jara barka luuqada waxaa bixinaya oo wada shaqayna keenaya degmada Avesta iyo xarumaha ganacsi ee maxaliga ah ee degmada.

Dadka ay degmadu meelayso waxaa lagu maal galinayaa iyadoo ay degmadu waaxdeeda is dhex galku ka soo iibsato saacado wax barasho oo ugu badnaan ah wax barasho SFI ugu badnaan 100 saacadood qofkiiba waxaana laga soo gadayaa baridda dadka waa wayn. Saacadahana waxaa ka mid ah akhris iyo jara barba. Haddii baahi gaar ah jirto waxaa dhici karta in saacadaha sfi ga la kordhiyo, tusaale ahaan far barashada.

Xannaanada carruurta

Carruurta degmada lagu meeleeyay waxay degmadu siinaysaa boos xannaano sida ku cad isla xeerka carruurta kale degmada deggan u yaal.

Dugsiga hoose

Carruurta da'doodu gaartay qasabka dugsiyada waxaa lagu qorayaa dugsiga hoose isla marka la qaabilaba. Carruurta waalidkeed waa inay ka qayb qaataan hadba sida ugu macquulsan ee ugu horraysa wax qabadka dugsiyada.
Tallaabada ugu horraysa ee lagula xiriirayo dugsiga hoose waxaa ku kulmaya waalidiinta carruurta dhalay, isku duwaha is dhex galka iyo shaqaalaha dugsiga hoose. Dugiga waxaa laga doonayaa inay suurto galiyaan qof ku hadlaya carruurta afkooda hooyo oo casharada dugsigana ku siin kara afkooda hooyo oo walibana u noqda turjubaan caawiya mararka qaarkood.
Isla marka carruurta la keeno dugsiga marka ugu horraysa waxaa lala kulmayaa maamulaha dugsiga, macalinka ay qusayso iyo dareyeelka caafimaadka dugsiga.

Barashada dugsiga sare
Dhallin yarada cusub ee ay da'doodu tahay 16 – 20 sano waxay billaabayaan dugsiga sare ee dhallin yarada ama wax barashada dadka waa wayn sfi.
Hadba wax barashada u fiican dhallin yaradu waxay ku xirantahay sida ay wax u soo barteen iyo shaqsi kastaa baahidiisa wax barasho siduu u billaabi lahaa. Waxaa la qorsheeyaa kulan lala yeeshi dhallin yarada, isku duwaha is dhex galka, hagaha wax barashada ee dugsiyada sare iyo hagaha wax barashada ee wax barashada dadka waa wayn.
Haddii cunugu ka yaryahay 18 sano waxaa xitaa kulanka ka qayb qaadanaya waalidkiis.

Daryeelka cudurka iyo caafimaadka
Qaxootiga iyo galtida kale ee haysata degenaashaha waddanka waxay soo hoos galayaa caymiska guud ee bukaanka. Taasi macnaheedu waa waxay xaq u leeyihiin daryeelka caafimaadka iyo daeryeelka ilkaha iyadoo ay isku shuruud yihiin dadka kale ee degmada deggan.

Daryeel iyo xannaano
Qaxootiga iyo galtida kaleba waxay leeyihiin xaqa ay leeyihiin dadka kale degmada deggan hadba wixii ku saabsan wax qabadka degmada ee daryeel iyo xannaano ah sida ku cad sharciga.
Degmaduna xaq bay u leedahay in lacag gaar ah lagu siiyo sida ku cad cutubka 17 – 19 xeerka 1990:927 ee ku saabsan deeqda dowladda ee lagu qaato qaabilaadda qaxootiga iwm.

Tallaabooyinka gacan ka gaysashada is dhex galka
Hoggaanka barashada wuxuu sannad kastaa ogolaadaa kharash wax looga qabto danaha gacan ka gaysiga is dhex galka. Kharashkaas waxaa loo isticmaal wax qabad horu marineed gaar ah meelaha is dhex galka.
Gacan ka gaysashad si dhex galka tallaabooyinkiisu waxay leedahay dhowr hadaf iyo istiraajiyo gaar ah oo muhiim u ah shaqo is dhex gal qani ah qaabaynteed.

Shaqada iyo masaruufka
Hadaf

- Wax qabadka degmadu waxay raad ku reebaysaa aragti furan oo ku wajahan ujeedooyinka badan ee bulshada iyo khibradda nolosha dadka, aqoon iyo taageero ku saabsan kala duwanaanshah dhaqanka iyo bulshada.

Istaraatijiyadda
Degmadu waa inay gacan ka gaysataa in xooggeeda shaqaalaha uu u dhigmo ajaaniibka ku dhalatay dibadda inya yihiin qayb ka mida shacabka.
Degmadu waa inay gacan ka gaysataa is baddalka hay'adaha dowladda, shirkadah khaaska ah, jamciyadaha iwm. In ay degmadu qaadato hanti aqoonta ay in badan oo qaxooti ah la soo galeen isla markaasan la siiyo wax barasho iyo goobo jara bar.

Lammaanayaasha muhiimka u ah wada shaqaynta

Degmada wax qabadyadeeda, shirkadaha guryaha, jamciyadaha iyo shirkada khaaska iyo xafiiska xiriirka shaqada.

Tusaale kamida dhaqdhaqaaq
In la siiyo barasgo luuqadeed ama jara bar xirfadeed iyo wax barasho aqooneed.
In la suurto galiyo in la qiimeeyo aqoon iyo waayo aragnimo uu leeyahay ka qayb qaatahan inta ka horraysa barnaamijka gogol dhigga isla arrintaas ayaa lagu dhisayaa kaalinta xafiiks xiriirka shaqadu ka qaato wixii horay u soo dhacay.

Ka qayb qaadasho iyo saamayn ku yeelasho
Hadaf

- Degmadu waxay difaacaysaa dadka oo dhan xaqooda iyo in qofku si fir fircoon uga qayb qaato geeddi socodka dimoqraadiyadda iyo suurto galnimada in uu qofku muuqdo oo uuna saamayn ku yeesho wax qabadka hawlaha dowladda

Istiraatijiyadda
Degmada iyo waliba maamuladeeda waa inay ku kalsoonaad turjubaan dhammaan wixii u baahan in lala xiriiro hadba waaxdii ay qusayso.
War bixin qoraal ah waa inay jirtaa dhammaan luuqadaha waa wayn. Taasi waxay xitaa muhiimad wayn u tahay in la sii wado tallaabooyinka war bixineed ee quseeya degmada dadkeeda cusub iyo waliba degmada dadkeeda guud, danta laga leeyahayna waa in la sii kordhiyo is fahamka iyo dhinacyada dulqaadka iyo aqbalaadda.

Kaalimo muhiim ah
Hoggaanka degmada, isbahaysiyada wax barashada iyo jamciyadaha

Tusaale ku saabsan dhaq dhaqaaqyada
Shaqo firfircoon oo kordhisa ka qayb qaadasho wacan oo ah kooxda uu manta qofku la heerka yahay.

Dhaqanka iyo waqtiyada firaaqada
Hadaf

- Dhammaan dadka degmada deggan waa inay si fiican u gudan karaan dhaqankooda waqtiyadooda firaaqada ah ee degmadu bixiso.

Istiraatijiyadda
In laga shaqeeyo in ujeeddo is dhex galeed uu ka jiro qorshaha degmada eek u saabsan dhaqanka iyo waqtiyada firaaqada ah.
In laga shaqeeyo arrimaha is dhex galka oo lid ku ah cunsuriyadda iyo shisheeye nacaybka iyo waliba in ay suurto galnimada ay duymarku uga qayb qaataan waliba si cad oo waadax ah ee dhaqanka iyo waqtiyada firaaqada oo ay degmad Avesta taageerayso.
In laga shaqeeyo in jamciyaduhu wax qabadkoodu uu gacan ka gaysto is dhex galka oo uu lid ku noqdo dhammaan wixii fogayn iyo shisheeye nacayb ah.

Jilaa muhiim ah
Hogaanka barashada, waaxda maxsuulka, dhaqan iyo waqtiyada firaaqada iyo waliba jamciyadaha.

Tusaale dhaq dhaqaaqa ah
Dib u eegid deeqda degmada ee ay siiso jamciyadaha si ay is dhex galka iyo gacan ka gaysashada wax qabadka sinnaanta loogu xiiso galiyo dadka cusub. In la xiiso gali kordhinta sinnaanta raga iyo dumarka.

Isku dubba ridid, la shaqayn iyo fulin.

Shaqada ah in la fuliyo qorshaha nis dhex galka iyo xiiso galinta si loo horu mariyo oo loo sii wanaajiyo hoggaanka barashadu wuu ka nasanayaa.
Shaqada is dhex galku maahan shaqo ama hawl madax bannaan. In is dhex gal lagu guulaystay oo ah qof cusub oo soo degay degmada waxay u baahantahay ihtimaam iyo shaqo si wayn oo qabto oo ah urur shaqeedka degmada Avesta.
Arrin muhiim ku ah wax qabadka is dhex galku waa in loo shaqeeyo xiiso galin iyo horu marin wada shaqayn qaabaysan iyo shabakad waliba xiriiro si ay u fududaadaan is dhex galka dadka ku cusub degmada Avesta.

Arrintan isku soo xirkeedu waa in qof kastoo hoggaanka degmada ka mid ah ama maamulada at qaataan mas'uuliyadda iyagoo gacan ka gaysanaya is dhex galka degmada Avesta.

Muhiimaddu waa in la sii wadaa wax qabadyada war galinta noocyo kala duwan iyo baddalidda is baddalka shaqeed ee danteedu tahay in la siiyo aqoon ku saabsan arrimaha qaxootiga iyo soo galootiga iyo waliba in laga hortagaa shisheeye nacaybka iyo cunsuriyadda. Taasina waxaa lagu gaadhayaa war galin ku socota shaqsiyaadka shacabka degmada ah, waaxduna waa inay ka qayb qaadato siyaalo kala duwan iyo nashaadaad kala duwan oo la shaqeeyaan jamciyadaha qaxootiga iyo ururada kale.

Daba gal iyo qiimayn
Daba galka iyo qiimaynta ee shaqada is dhex galka iyo hadafyada la dhigtayba waxay u dhacayaan sannad kastaa oo ah isla sida wax qabadyada kale ee hoggaanka barashada.